# Soo dhawoow!
# Qorshaha Istiraatiijiyadeed ee 2033: Kulanka Fogaan Aragga
## Febraayo 2026

# Soo dhawoow

- Fiidiyow soo dhaweyn ah oo ka socdo Kormeere Guud Stacie Stanley
- Qorshaha Istiraatiijiyadeed ee SPPS 2033
- 3-da Aag ee Mudnaanta Istiraatiijiyadda
- Qolalka kooxaha yaryar
  - Soo dhawayn
  - Dood
- Gunaanad

# Soo dhaweyn ka socoto Kormeere Guud Stanley



Inclusion
Instruction
Infrastructure
SPPS 2033



# Qorshaha Istiraatiijiyadeed ee 2026-27 ilaa 2032-33 daahfurka jihadeena cusub ee istiraatiijiyadeed

Saint Paul Public Schools

# Qorsheynta Istiraatiijiyadeed




Yoolka geeddi socodka qorsheynta istiraatiijiyadeena waa in aanu gaarno go'aamo oo aan qaadno tallaabooyin qaabeeya isla markaana haga waxay ay yihiin *SPPS, waxa aanu qabano, iyo sababta aan u samayno*.

Yaa ku lug leh?

- Ardayda
- Qoysaska
- Shaqaalaha
- Bulshada

# Wejiya Qorsheynta Istiraatiijiyadeed

| | |
|---|---|
| Janaayo - Febraayo 2026 | ● Qorsheynta daahfurka<br>● Qiimeynta baahiyaha daahfurka<br>● Isu Yeerista Koox Hawleedka La-talinta<br>● Qabashada kaqaybgalka bulshada ee fogaan aragga ah |
| Maarso - May 2026 | ● Isku-dubaridka dhammaan macluumaadka la ururiyay<br>● Isu Yeerista Kooxaha Samaynta Istiraatiijiyadda<br>● Qabashada ka-qeybgalka bulshada<br>● Qoritaanka istiraatiijiyadaha |
| May - Juun 2026 | ● Dib-u-eegista iyo dib u cusboonaysiinta istiraatiijiyadaha<br>● Qorista iyo dib-u-eegista qorshaha hirgelinta<br>● Dhamaystirka qabyo qoraalka qorshaha istiraatijiyadeed |
| Juulaay - Agoosto 2026 | ● Soo jeedinta kormeeraha guud iyo meelmarinta Guddiga |
| Sibteembar 2026 | ● Daahfurka Qorshaha Istiraatiijiyadeed ee SPPS 2033 |

# Yaa ku lug leh dejinta Qorshaha Istiraatiijiyadeed?

| CIDDA | WAXA | GOORTA |
|---|---|---|
| Dr Stanley, Kormeeraha Guud | Waxay hagtaa shaqada waxayna keentaa qorshe uu ansixiyo Guddiga | Joogto |
| Koox-Hawleedka La-talinta: 35 ka kooban arday, shaqaale, waalidiin, la-hawlgalayaal | Dib-u-eegista natiijooyinka iyo qorshayaasha la soo jeediyay, La-talinta qorshayaasha horumarineed iyo kuwa ugu dambeeya | Febraayo-Juun |
| Ka-qeybgalka Bulshada: U furan qof kasta | Ka talo-bixinta xaaladaha hadda jira<br>Bixinta fikrado ku saabsan hindisayaasha la soo jeediyay | Febraayo, Abriil, May |
| Kooxaha Samaynta Istiraatiijiyadda | Qorista xeeladaha lagu gaaro yoolalka<br>Qorista qorshaha hirgelinta sanad dugsiyeedka SY26/27 | Maarso - Abriil |
| Kooxda Shaqada Qorshaha Istiraatiijiyadeed | Maareynta geeddi socodka iyo qorsheynta | Joogto |

# SPPS 2033: 3-da Aag ee Mudnaanta & 10 Mowduucyada Muhiimka ah

| | |
|---|---|
| **Waxbarid Heer Sare ah**<br>Xaqiijinta in arday kasta uu qaato waxbarasho tayo sare leh, dhaqan ahaan ka jawaabta oo dardargelisa koritaankooda | • Yaraynta Daldaloolada Guulgaarista & Hindisaha Dardargelinta Waxbarashada ee Koox Kasta oo Arday ah<br>• Kaabayaasha Horumarinta Joogtada ah<br>• Joogtaynta Akhris Qoraalka iyo isku Duubnaanta |
| **U-dhannaanshaha Loo Qasday**<br>Abuurista dugsiyo halkaasoo arday kasta iyo xubin kasta oo shaqaale uu dareemo sharaf, xiriir iyo taageero dhamaystiran | • Dib-u-eegidda Anshaxa iyo Ka Tirsanaanta<br>• Heerarka Wada-xiriirka Qoyska iyo Helitaanka Luuqadda<br>• Horumarinta Barnaamijyada Waxbarashada Gaarka ah<br>• Haynta Shaqaalaha iyo Xeeladda Qorista |
| **Kaabayaal Waara**<br>Falanqayn ujeedaysan oo ku saabsan sida aan maalgelinta ugu qoondaynayno xarumaha, shaqaalaha iyo barnaamijyada iyadoo lagu eegayo indhaha sinnaanta | • Falanqaynta Qaababka Qoondaynta Khayraadka Hadda<br>• Qiimaynta Sinnaanta Xarunta & Qorshaha Dheeraadka ah<br>• Ololaha Soo kabashada Suuqgeynta iyo Diiwaangelinta |

# Dooro mowduuc muhiim ah oo aad wax ka ogaato oo bixi jawaab-celin ku saabsan:

- Yaraynta Daldaloolada Guulgaarista & Hindisaha Dardargelinta Waxbarashada ee Koox Kasta oo Arday ah
- Horumarinta Barnaamijyada Waxbarashada Gaarka ah
- Dib-u-eegidda Anshaxa iyo Ka Tirsanaanta
- Wada-xiriirka Qoyska iyo Helitaanka Luuqadda
- Suuq-geynta iyo Diiwaangelinta

# Su'aasha Doodda Kooxda

Ka fikir canugaaga, deriskaaga, ama mid ka mid ah ardaydaada:

**Maxaad rajaynaysaa inay kororsadaan ka arday ahaan SPPS? Wakhtiga ay qalin-jebiyaan?**

Soo gal wada sheekaysiga, iyo/ama gacanta taag haddii aad rabto inaad hadasho.

# Qolalka Kooxaha Yaryar

# Yaraynta Daldaloolada Guulgaarista & Hindisaha Dardargelinta Waxbarashada ee Koox Kasta oo Arday ah

- Waxaa jira qaab laga walaaco oo kala duwanaansho nidaami ah oo ka jira gudaha iyo guud ahaan degmada xagga xisaabta iyo akhriska labadaba. Aqoonta guud ee xisaabta iyo akhriska waa mid aad u hoosaysa.

- Guusha tacliinta si siman uguma baahsana kooxaha ardayda ee kala duwan taasoo abuuraysa farqiyo waawayn oo u dhexeeya ardayda cad iyo kooxaha isirada/qowmiyadaha kale.

- Kooxaha qaar, sida ardayda barata luuqadda Ingiriisiga, waxay la daala dhacayaan heerar aad u hooseeya oo aqoonta ah.

- Inkastoo aan dadaalnay inti karaankeena ah, qaababkani weli waa ay sii socdaan.

# Yaraynta Daldaloolada Guulgaarista & Hindisaha Dardargelinta Waxbarashada ee Koox Kasta oo Arday ah




Saint Paul Public Schools

# Yaraynta Daldaloolada Guulgaarista & Hindisaha Dardargelinta Waxbarashada ee Koox Kasta oo Arday ah

Haddii ardaygaaga ama arday aad garanayso uu wajahayo dhibaatooyin tacliimeed, maxaa loo heli karaa in lagu caawiyo? Qaababkee ayay taageerada tacliintu u daboolaysaa baahiyaha ardayda? Haddii aysan daboolaynin, maxay yihiin caqabaduhu?

Marki ardaygaaga ama arday aad garanayso uu gaaro guul tacliimeed, maxay ahayd waayo-aragnimada guusha gaarsiisay? Sharrax waxa guusha u horseeday ardayga?

Maxaa su'aala ah oo aad ka qabtaa aaggan?

# Horumarinta Barnaamijyada Waxbarashada Gaarka ah

Tirada ardayda qaadata adeegyada waxbarashada gaarka ah ee SPPS waa ay sii kordhaysay



# Horumarinta Barnaamijyada Waxbarashada Gaarka ah

Iyadoo boqolkiiba ardayda ku jirta Federal Setting II ay hoos u sii dhacaysay, Federal Setting III ayaa kordhaysay isla muddadaas. Federal Setting I ayaa ah mid deggan.




| Goobta Federaalka Boqolkiiba inta Lagu Jiro Fasal Gaar ah |
| --- |
| Setting I: 0-19% |
| Setting II: 20-60% |
| Setting III: 61-99% |

# Horumarinta Barnaamijyada Waxbarashada Gaarka ah

Haddii ardaygaaga ku jira waxbarashada gaarka ah ama arday ku jira waxbarashada gaarka ah oo aad garanayso uusan si buuxda u helin waxbarashada guud, sidee bay taasi u saamaysaa waxbarashadiisa iyo waayo-aragnimadiisa waxbarasho? Maxay yihiin caqabadaha ka hor taagan helitaanka buuxa?

Marki ardaygaaga ku jira waxbarashada gaarka ah ama arday ku jira waxbarashada gaarka ah oo aad garanayso uu guul ka gaaro dugsiga, maxay ahayd waayo-aragnimada guusha gaarsiisay?

Maxaa su'aala ah oo aad ka qabtaa aaggan?

# Anshaxa iyo Ka Tirsanaanta

Ardayda dugsiga dhexe (fasalada 6-8) ayaa si joogta u ah boqolkiiba tirada ugu badan ee ardayda la cayriyo.



# Anshaxa iyo Ka Tirsanaanta

Guud ahaan isirka/qowmiyadda, kooxda ugu badan waa ardayda Madow/Afrikaanka Maraykanka



# Anshaxa iyo Ka Tirsanaanta

Inta badan ardayda dugsiga sare ee dhigata fasalada 8, 9, iyo 11 waxay ku sheegeen Ra'yi Ururinti Ardayda MN ee 2025 in macalimiinta ay daneeyaan (93%) iyo in dadka qaangaarka ah ay ula dhaqmaan si caddaalad ah (86%). Si kastaba ha ahaatee, rubac ka mid ah ardayda ayaanan ku raacin ama ugu raacin si xooggan in xeerarka ay yihiin kuwo caddaalad ah iyo in macalimiinta ay u daneeyaan ka qof ahaan.



# Anshaxa iyo Ka Tirsanaanta

Haddii ardaygaaga ama arday aad garanayso la edbiyo, sidee ayuu dugsigu u bixinayaa fursadaha koritaanka iyo la xisaabtanka?

Marki ardaygaaga ama arday aad garanayso uu sharaf iyo ka tirsanaan uu ku dareemay dugsiga, sharrax sida xaalku u ekaa?

Maxaa su'aala ah oo aad ka qabtaa aaggan?

# Wada-xiriirka Qoyska iyo Helitaanka Luuqadda

Qoysaska SPPS waxay guriga ku hadlaan in ka badan 114 luuqadood.

Shanta luuqadood ee ugu badan ee looga hadlo guryaha ee SPPS waa Ingiriisi, Hmong, Isbaanish, Karen iyo Soomaali.

| Luuqadda Guriga | Boqolkiiba Qoysaska |
|---|---|
| Af Ingiriisi | 56% |
| Hmong | 13% |
| Af Isbaanish | 11% |
| Karen | 8% |
| Soomaali | 4% |

# Adeegyada Taageerada Luqadda ee Qoysaska

Qorshaha Helitaanka Adeegyada Luuqadda wuxuu qeexaa sida dugsiyada ay u adeegsan karaan adeegyada hoose si ay ugu xirmaan qoysaska u baahan taageerada luuqadda.

**1**
Turjubaanada Loo Waco

**2**
Language Line

**3**
Wakaaladaha Bannaanka

# Wada-xiriirka Qoyska iyo Helitaanka Luuqadda

Language Line waa aalad wada-xiriir oo ay adeegsato degmada.

Labadi sano ee la soo dhaafay, adeeggan waxaa qoysaska lagu siiyay luuqado badan. Nofeembar waxaa loo soo qaatay tusaale ahaan sababtoo ah waa bisha marka shirarka waalidka/macalimiinta la qabto.

Wadar ahaan bil kasta, Language Line waxay ku dallacday ku dhawaad 20,000 oo daqiiqo dhammaan dugsiyadeena.

| Language | November 2024 | November 2025 |
|---|---|---|
| AMHARIC | 287 | 532 |
| ARABIC | 33 | 229 |
| BURMESE | 336 | 205 |
| DARI | 332 | 231 |
| FRENCH | 218 | 135 |
| GERMAN | 20 | |
| HAITIAN CREOLE | 28 | 53 |
| HMONG | 1,456 | 2,172 |
| KAREN | 5,367 | 5,036 |
| KARENNI | 227 | 286 |
| KHMER | 127 | 107 |
| KINYARWANDA | 87 | 12 |
| KOREAN | 4 | 46 |
| LAOTIAN | 18 | |
| LINGALA | 14 | |
| LUGANDA | | 63 |
| MANDARIN | | 59 |
| MONGOLIAN | | 9 |
| NEPALI | 336 | 255 |
| OROMO | 753 | 765 |
| PASHTO | 963 | 621 |
| PORTUGUESE | 84 | 84 |
| PULAAR | | 31 |
| RUSSIAN | 46 | |
| SOMALI | 1,235 | 1,416 |
| SPANISH | 6,242 | 7,457 |
| SWAHILI | 509 | 964 |
| THAI | 10 | |
| TIGRE | | 56 |
| TIGRIGNA | 484 | 447 |
| TURKISH | 166 | |
| UKRAINIAN | 113 | 45 |
| URDU | | 10 |
| VIETNAMESE | 315 | 156 |

# Wada-xiriirka Qoyska iyo Helitaanka Luuqadda

Noo sheeg wax ku saabsan wakhti oo aad la xiriirtay shaqaalaha SPPS oo wada-xiriirku uusan noqon mid soo dhaweyn leh ama ka jawaaba baahiyahaaga. Sharax waxa dhacay.

Goorma ayaad la xiriirtay dugsigaaga ama degmada oo laguula macaamilay si wanaagsan? Maxaa kaaga dhigay mid kuu wanaagsan?

Maxaa su’aala ah oo aad ka qabtaa aaggan?

# Suuq-geynta iyo Diiwaangelinta

Muddo dhowr sano ah, diiwaangelinta ardayda ee SPPS hoos ayay u dhacaysay.



# Suuq-geynta iyo Diiwaangelinta

Hoos u dhaca diiwaangelinta waxaa qayb ahaan sabab u ah hoos u dhaca tirada dhalashada iyo hoos u dhaca guud ee dadka guud ahaan magaalada. Garaafka hoose, xarriiqa buluugga wuxuu u taagan yahay dhammaan carruurta da'aha 5-18 ee ku nool magaalada St. Paul. Qaybaha oranjida ah waxay u taagan yihiin diiwaangelinta K-12 ee SPPS. Farqiga u dhexeeya xariiqa buluuga iyo qaybta oranjida wuxuu u taagan yahay tirada ardayda ee ku nool St. Paul balse dhigata dugsiyo aan ahayn kuwa SPPS.



# Suuq-geynta iyo Diiwaangelinta

Ardayda badankooda ee ka diiwaangashan dugsiyo ka baxsan SPPS badanaa waxay dhigtaan:

- Dugsiyada dawliga ee gaarka loo maamulo (61%)
- Dugsiyada aan dawliga ahayn (22%)
- Degmo dugsiyeedyada kale ee dawliga ah (17%)

Xogta ku taasha dhanka midige waxay ka socotaa 2025, balse qaabkani wuxuu ahaa mid joogta ah in muddo ah.



# Suuq-geynta iyo Diiwaangelinta

Maxaad u joogtaysay inaad doorato SPPS? Yaa kaa caawiyay ama maxaa kaa caawiyay inaad la xiriirto ama aad sahmiso dugsigaaga ama degmada? Maxaa kaa dhiga mid ku xiran?

Haddii aad garanayso qoysas doortay xulasho kale, maxay ahaayeen sababaha? Maxay kula tahay inay kordhin doonto diiwaangelinta?

Maxaa su'aala ah oo aad ka qabtaa aaggan?

# Mahadsanid